

**WARQADDII  
SADDEXAAD EE RASUUL  
YOOXANAA**

**Gayos Waa Loo Bogay**

**1** <sup>1</sup>Anigoo odayga ah waxaan warqaddan u qorayaa gacaliye Gayos oo aan runta ku jeclahay.

<sup>2</sup>Gacaliyow, waxaan kuugu duceeyaa inaad wax kasta ku liibaantid oo aad caafimaad qabtid siday naftaadu u liibaansan tahay. <sup>3</sup>Waayo, aad baan ugu farxay markii walaalo yimaadeen oo ka markhaati fureen runtaada iyo sidaad runta ugu socotid. <sup>4</sup>Ma lihi farxad tan iiga weyn inaan maqlo in carruurtaydu ay runta ku socdaan.

<sup>5</sup>Gacaliyow, aaminnimaaad ku samaysaa shuqul kasta oo aad u samaysid walaalaha iyo shisheeyahaba. <sup>6</sup>Iyagu jacaylkaagay kiniisadda horteeda kaga markhaati fureen. Wanaag baad samayn lahayd haddii aad iyaga u ambabbixisid sida Ilaah istaahilo; <sup>7</sup>maxaa yeelay, magiciisa aawadiis ayay u ambabbexeen iyagoo aan waxba ka qaadan dadka aan Yuhuudda ahayn. <sup>8</sup>Sidaas daraaddeed waxaa inagu waajib ah inaynu kuwaas oo kale soo dhowayno, si

aynu u noqonno kuwa runta kala wada shaqeeya iyaga.

**Khilaaf Baa Kiniisadda Ku Jiray**

<sup>9</sup>Wax baan kiniisadda u soo qoray, laakiinse Diyotrefees oo jecel inuu iyaga ka sarreeyo, na aqbali maayo. <sup>10</sup>Sidaas daraaddeed, haddaan imaado, waxaan xusuusin doonaa shuqulliisa uu sameeyo isagoo hadallo xunxun nagu shubaya. Taasu kuma filla isaga, mana aqbalo walaalaha, kuwii aqbali lahaana wuu u diidaa, kiniisaddana wuu ka eryaa.

<sup>11</sup>Gacaliyow, ha ku dayan waxa sharka ah, laakiinse ku dayo waxa wanaagsan. Ka samafalaa waa ku Ilaah, ka shar falaase Ilaah ma uu arkin. <sup>12</sup>Dadka oo dhammu way u markhaati furaan Deemeetriyos, runta qudheedu way u markhaati furtaa, annaguna waannu u markhaati furnaa, waanad og tahay in markhaatifurkayagu run yahay.

<sup>13</sup>Waxaan hayay waxyaalo badan oo aan kuu soo qoro, laakiinse dooni maayo inaan qalin iyo khad kuugu soo qoro. <sup>14</sup>Laakiin waxaan rajaynaya

inaan dhowaan ku arko, oo aynu  
afkeenna iskula hadli doonno.

Nabadu ha kula jirto.  
Saaxiibbadii way ku soo

salaamayaan. Saaxiibbada igu  
salaan mid kasta intaad magiciisa  
ugu yeedhid.